

Heerka saddexaad ayaa lagu sii jirayaa

Xaaladda faafidda cudurka iyo degmooyinka oo culays weyn saaran yahay ayaa keenay in dawladdu go'aamiso in lagu sii jiro heerka saddexaad ee qorshaha dib u furidda waddanka ilaa dad intan ka badan ay ka qaadanayaan tallaal buuxa.

– Nooca fayraska delta iyo is dhexgalka dadka oo badan ka dib markii laga soo laabtay fasaxii xagaaga ayaa keenay in cudurka safmarku Norway ku bato. Waxaan doonaynaa in carruurta iyo dhallinyaradu helaan maalin waxbarasho oo caadi ah, waxaan degmooyinka kula talinnay in ay heer cagaar ah ahaadaan marka iskoollada la furayo. Meelo badan oo waddanka ka mid ah ayaa furitaanka iskoolladu ku adkayd ardayda, macallimiinta iyo degmooyinka intaba. Degmooyinku waa in ay helaan wakhti ay xaaladda si wanaagsan ugu xakameeyaan. Sidaas darteed ayaan ugu sii jireynaa heerka saddexaad, ayay tiri raysal wasaare Erna Solberg.

Xakamaynta faafidda cudurka

Dawladdu waxay doonaysaa in ay xakamayso faafidda cudurka ilaa inta dad badan ka qaadanayaan tallaal buuxa. Istaraatiijiyaddu weli waa marka cudurku deegaan ka dillaaco in looga hortago tillaabooyin deegaankaas lagu soo rogayo. Sax ma aha in tillaabooyin heer qaran ah oo cusub lagu soo rogo dadka ku nool meelo uu cudurka ku yar yahay ama uusanba ka jirin.

– Intii cudurka safmarka ah socday waxaan aragnay in degmooyinku si fiican u xakameeyeen cudurka degaankooda ka dillaaca. Waxaan ku kalsoonnahay in degmooyinku qiimayn wanaagsan samayn doonaan mustaqbalka. Waxaan jeclahay in aan degmooyinka cudurku ku badan yahay ku boorriyo in ay ka fikiraan in heerka jaalluhu iskoollada u dhaamo heerka cagaarka ah. Waxayba dhab ahaantii mararka qaar horseedi kartaa in ay carruurta iskoolka joogaan wakhti mararka kale ka badan. Waxaan ku kalsoonnahay in degmooyinku, ayaga oo kaashanaya Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) iyo Agaasinka

Caafimaadka, in ay gaari doonaan go'aammo wanaagsan oo sax ah, ayay tiri raysal wasaaruhu.

Meelo badan oo waddanka ah ayaa iskoollada cudurku ku badan yahay. Wuxuu cudurku si gaar ah ugu faafayaa dadka da'da yar, wuxuuna ugu badan yahay kuwa u dhexeeya 13 – 19 sano.

Sida carruurta u roon

– Intii uu socday cudurkan samfarka ah oo dhan waxaan isha ku haynay sida carruurta iyo dhallinyarada u roon, laakiin waxaan og nahay in carruurta kuwooda ugu da'da yar in ay culays badan xambaarsanaayeen intii safmarku socday. Waxaan doonaynaa in ay hadda inta ugu badan ee suurtaggalka ah nolol caadi ah ku noolaadaan, ayay tiri raysal wasaare Solberg.

Degmooyinka uu cudurku si weyn uga dhex dillaaco carruurta iyo dhallinyarada, waa in ay ka fikirnaan in ay heer jaalle ah galaan in muddo ah si ay cudurka si wanaagsan ugu xakameeyaan.

– Waxay sidoo kale samayn karaan in ay si joogto ah tijaaba-wadareed u qaadaan si ay si wanaagsan ula socdaan dadka uu cudurku ku dhacay iyo kuwa iskoolka tegi kara, ayay tiri Solberg.

[Dawladdu waxay go'aamisay in ay raacdo taladii FHI ee ahayd in tallaalka loo fidiyo carruurta u dhexaysa 12 ilaa 15 sano.](#)

Dib baa loo dhigayaa qorshihii dib-u-furidda

Dawladdu hadda sii wadi mayso qorshihii dib-u-furidda waddanka, waxaana lagu sii jirayaa heerka 3-aad ilaa inta laga gaarayo [maalmo caadi ah oo wata heegan sare.](#)

– Goorta loo gudbayo heerka xiga waxay ku xiran tahay macluumaadka la helo, ee loo qaban maayo taariikh gaar ah. Laakiin arrinta ugu muhiimsan ayaa ah in aan ku dhownahay hammigeennii ahaa in boqolkiiba 90 dadka waaweyn ay tallaalka buuxa qaataan, ayay tiri Solberg.

Waxay raysal wasaaraddu dadka xasuusisay in uu heerka 3-aad weli wato talooyin iyo xeerar looga hortagayo faafidda cudurka. Kuwa ugu muhiimsan waa

in guriga la joogo haddii la xanuunsado, in la kala fogaado iyo in gacmuhu nadiif ahaadaan. Xataa kuwa tallaalka buuxa qaatay way khuseeyaan xeerarku.

– Waxaa iyana sidoo kale weli loo baahan yahay in cudurka ka dillaaca deegaan gaar ah looga hortago tillaabooyin deegaankaas lagu soo rogayo. Waa muhiim in degmooyinku tillaabooyinka ku aaddiyaan meelaha looga baahan yahay, si aan cudurka u xakamayno, ayay tiri Solberg.

Maalin caadi ah oo wadata heegan sare

Marxaladda loogu yeero maalin caadi ah oo wadata heegan sare waxay ka kooban tahay laba qodob:

- Samfarku aad uma saamayn doono nololmaalmeedka dadweynaha. Waa in weli la xusuustaa nadaafadda gacmaha- iyo qufaca, loo hoggaansamaa in guriga la joogo haddii la xanuunsado, oo tijaabo la iska qaadaa marka taladu sidaas sheegayso.
- Mas’uuliyiinta heer deegaan iyo kuwa heer qaran ayaa isbeddelka cudurka si fiican ula soconaya, si tillaabooyin degdeg loogu soo rogi karo haddii ay xaaladdu is beddesho. Dawladda, hay’adaha caafimaadka, isbataallada iyo degmooyinka ayaa intuba yeelan doona kormeer iyo heegan sare.

Qaado laba cirbaddood

Ku dhowaad boqolkiiba 90 dadka waaweyn ah ayaa hadda qaatay hal cirbad oo tallaalka ah. In ka badan boqolkiisa 70 ah dadka waaweyn oo dhanna waxay qaateen laba cirbaddood oo tallaalka ah.

– Waxaan dhammaan dadka ku boorrinayaa in ay soo hor marsadaan cirbadda labaad marka ay degmadu tallaalka u fidiso. Markaas ayay dadku si fiican u difaacan yihiin, ayaga oo ka difaacan in ay aad u xanuunsadaan iyo in ay dadka kale cudurka u gudbiyaan ba. Inta aan tallaalayno dadka noo harayna, waxaa muhiim ah in aan xusuusanno arrintii aan xariifka ku noqonnay: In aan guriga joogno marka aan xanuunsanno, gacmuhu nadiif ahaadaan oo dadka ka fogaanno marka aynaan joogin guryaha gaarka ah. Taas oo khusaysa xataa kuwa tallaalka buuxa qaatay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Is-beddello lagu sameeyay TISK

Dawladdu istaraatiijayadda TISK (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda cudurka iyo karantiilka) sida ay hadda tahay ayay u daynaysaa, laakiin waxaa la qorshaynayaa in dhowaan loo gudbo TISK is-beddel lagu sameeyay ka dib marka degmooyinka iyo guddoomiyayaasha gobollada lagala hadlo waxay ay taasi ka koobnaan doonto iyo goorta ay dhaqangelayso.

– TISK wax laga beddelay waxaa ay tusaale ahaan keeni doontaa in wax laga beddelo waajibka karantiilka oo uu kaasi qabto keliya dadka guriga deggan iyo dadka soke sidooda oo kale, ayuu yiri Høie.

Waxaa kale oo yaraan doona culayska ay raadraacidda cudurku degmooyinka ku hayso. Waxaa si guud cudurka looga baari doonaa keliya dadka guriga deggan iyo dadka soke sidooda oo kale. Kan cudurka laga helay laftigiisa ama dadka ku xeeran sida waalidka, iskoolka ama naadiga ciyaaraha ayaa la xiriiraya dadka kale oo uu kan cudurka laga helay u dhowaaday una sheegaya in ay tijaabo iska qaadaan.

–TISK wax laga beddelay wuxuu dhaqangelayaa marka ay degmooyinku diyaar u noqdaan, ayuu yiri Høie.

Wax-ka-beddello lagu sameeyay heerka saddexaad

Waxay dawladdu go'aamisay in wax-ka-beddello kale lagu sameeyo heerka saddexaad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka, ka dib markii ay sidaas ku taliyeen Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadka.

Qabanqaabooyinka lagu gelayo shahaadada koroonaha ee ay dhammaan dadku fadhiyaan goobo joogto ah oo loo tilmaamay, kana dhacaya gudaha, waxaa joogi kara ilaa iyo 5000 qof (horey u ahaa 3000) – haddii ay dibedda ka dhacayaanna 10 000 qof (horey u ahaa 7000 ayaa). Xaddidaaddii ahayd ugu badnaan boqolkiiba 50 inta goobtu qaaddo waa sideedii. Is-beddelku wuxuu dhaqangelayaa saqda dhexe habeenka sabtida ee 4-ta sibteembar.

– Waxaan islamarkaana FHI u dirnay in ay qiimayn ku sameeyaan in dadka hal cirbad qaatay weli la siinayo shahaado koroone oo cagaar ah oo ay ku isticmaalaan waddanka gudahiisa. Waxaan og nahay in aysan hal cirbad nooca delta u difaacin si la mid ah sida laba cirbadood. Taas darteed ayaan doonaynaa in qiimayn lagu sameeyo in hadda ka dib qofka looga baahan yahay in uu tallaal

buuxa qaato, tijaabo markaas la qaaday haysto ama uu covid-19 ku dhacay sanadkii u danbeeyay si loo siiyo shahaado koroone oo cagaar ah, ayuu yiri Høie.

Xayiraadaha soo gelidda waddanka ayagana wax-ka-beddello aan badnayn ayaa lagu samaynayaa. Waxaa ka mid ah in [saaxiibka/saaxiibadda iyo awoowe/ayeeyo boogasho ku imaan karaan laga billaabo saqda dhexe 12-ka sibteembar.](#)

– Waan og nahay in ay dad badani arrintaan sugayeen. Dadka dalka imaanaya waa in ay raacaan xeerarka karantiilka iyo kuwa tijaabo qaadista, ayuu yiri Høie.

- [Saaxiibka/saaxiibaddu waa in ay codsigooda soo mariyaan nidaamka codsiga UDI ee loogu tala galay boogashada saaxiibka/saaxiibadda](#)

Muuqaalka tillaabooyinka heer qaran

Waxaad halkaan ku arkaysaa muuqaalka tillaabooyinka heer qaran ee waddanka oo dhan ka jiri doona laga billaabo 2-da sibteembar. Meelaha uu cudurku ku badan yahay waxaa kale oo ay lahaan karaan tillaabooyin degaankaas gaar u ah.

Shuruudaha soo gelidda Norway

Weli xayiraado ayaa saaran soo gelidda waddanka. Xayiraadaha soo gelidda waddanka iyo xeerarka karantiilka waxaa ayada oo lagu salaynayo xaaladda faafidda cudurka loo kala qaybiyaa midabbada cagaar, midabka liinta, guduud, guduud tiq ah iyo basali.

Weli waxaa lagu talinayaa in fasaxa nasashada Norway dhexdeeda lagu qaato.

Dadka caddayn kara in ay tallaal buuxa qaateen ama uu covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay ayaga oo taas ku caddaynaya shahaadada koroona ee Midowga Yurub (EU), NHS Covid-pass ka soo baxay Wales/Ingiriiska ama shahaado Covid oo ka soo baxday Waqooyiga Ayrland waddanka way soo geli karaan waana laga dhaafayaa in ay tijaabo iska qaadaan ka hor inta aysan waddanka imaan ama in ay xadka isaga qaadaan iyo karantiilka soo gelidda waddanka.

Laga billaabo 12-ka sibteembar waxaa la oggolaanayaa in ay waddanka soo galaan ajnebiga ka yimid waddan saddexaad ee qof Norway deggan la leh mid ka mid ah xiriirka soo socda:

- Waalidka carruurtooda waaweyn iyo carruurta waaweyn waalidkooda
- awoowe/ayeeyo iyo carruur awoowe/ayeeyo loo yahay
- saaxiibka/saaxiibadda ka weyn 18 sano iyo ilmaha aan qaangaarin ee saaxiibka/saaxiibadda
- [Saaxiibka/saaxiibaddu waa in ay codsiga soo mariyaan nidaamka codsiga UDI ee boogashada saaxiibka/saaxiibadda](#)

Is-dhexgalka dadka marka la joogo guryaha gaarka ah

Waxaa lagu talinayaa in ay martidu ahaato ugu badnaan 20 qof, ayada oo laysku boorrinayo in dibedda lagu kulmo. Marka guryaha laysku booqanayo xaddidaadda tirada laguma darayo dadka difaacan (dadka tallaal buuxa qaatay, kuwa 1 cirbad oo tallaal ah qaatay saddex toddobaad marka ay ka soo wareegto iyo kuwa uu covid-19 ku dhacay 6-dii bilood ee u danbeeyay), laakiin weli waa in ay suurtagal tahay in la kala fogaan karo.

Dadka difaacan marka ay joogaan guryaha gaarka ah, way u dhowaan karaan (hal mitir uga dhowaan karaan) dadka kale ee iyaguna difaacan iyo dadka aan difaacnayn ee aan ka mid ahayn kuwa halista ku jira haddii uu cudurku ku dhaco.

Carruurta dhigata xannaanooyinka carruuraha iyo dugsiyada hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah (kohort)/fasalka/qaybta yihiin xataa haddii ay ka badan yihiin tirada dadka ku soo booqan kara ee lagu taliyay.

Ganacsiga

Ganacsatadu waa in ay suurageliyaan in ugu yaraan 1 mitir la kala fog yahay ayna lahaadaan nidaam wanaagsan oo looga hortagayo faafidda cudurka.

Makhaayadaha, biibitooyinka iyo baararka

Waxaa soo geliddu istaagaysaa saacadda: 24.00.

Waxaa shardi ah; diiwaangelin, khamriga in miis lagu baxsho, in la yareeyo tirada dadka jooga, in qof walba leeyahay meel uu fadhiisto iyo in la kala fogaado.

Safarrda

Wasaaradda Arrimaha Dibeddu (UD) weli waxay ku talinaysaa in aan loo bixin safarrada aan aad lagama maarmaanka u ahayn ee lagu tegayo dalalka ka baxsan EØS/Schengen, Ingiriiska iyo dalal saddexaad oo gaar ah (dalalka basaliga ah).

Safarrada waddanka gudahiisa waa loo bixi karaa. Dadka aan difaacnayn waa in ay taxaddar dheeri ah muujiyaan, islamarkaana safarkooda sii qorsheeyaan si ay uga hor tagaan in ay meelaha cudurka u kala gudbiyaan. Waxay weliba taasi si gaar ah u khusaysaa dadka ka safraya meelo uu cudurku ku badan yahay.

Dadka aan difaacnayn ee u safraya degmooyin ay ka jiraan tillaabooyin ka dabacsan kuwa degmadooda waa in ay raacaan tillaabooyinka ka jira degmadii ay joogeen safarka ka hor.

Iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha

Xannaanooyinka carruuraha iyo iskoolladu waxay raacayaan nidaamka nalka samaanfalaha ee cagaarka, jaallaha iyo guduudka ee heerarka tillaabooyinka kuwaas oo ku salaysan degmo kasta iyo xaaladda halkaas ka jirta.

Degmooyinka waxaa lagula taliyaa in ay iskoollada heer jaalle ah geliyaan mararka la filayo in ay taasi keeni doonto in ardayda iyo macallimiinta soo xaadiraya ay ka bataan kuwa haddii lagu jiri lahaa heer cagaar ah.

Waxbarashada sare

Goobaha waxbarashada ayaa la tegayaa laga billaabo teeramka dayrta.

Dadka goobjoogga ah iyo kuraasta ay fadhiyaan waa in la diiwaangeliyaa si loo fududeeyo hawlaha raadraacidada cudurka.

Goobaha shaqada

Tillaabooyinka guud ee ka hortagga faafidda cudurrada.

In qayb ahaan guryaha lagu shaqeeyo iyo/ama wakhtiyo kala duwan shaqada la galo.

Shaqabixiyaha ayaa in intii hore ka badan qiimaynaya in loo baahan yahay in guriga lagu shaqeeyo ayada oo taas loo eegayo khatarta kala qaadista cudurka ee degaankaas. Waa in ay suuraggal tahay in dhammaan 1 mitir la kala fogaan karo. Dadka difaacan uma baahna in ay ka fogaadaan dadka kale ee jooga goobta shaqada, laakiin waa in ay si gaar ah uga taxaddaraan dadka aan difaacnayn ee ka mid ah kuwa halista ku jira haddii uu cudurku ku dhaco.

Qabanqaabooyinka

Waxaa la isku boorrinayaa in qabanqaabooyinka dibedda lagu qabto meeshii gudaha lagu qaban lahaa.

Dadka aan difaacnayn ee ka yimaada meelo uu cudurku ku badan yahay ma aha in ay tagaan qabanqaabooyinka ka dhacaya degmooyinka kale.

Qabanqaabooyinka gaarka ah

Ilaa iyo 100 qof goobaha dadweynaha ama gole la kireystay/amaahday – gudaha iyo dibedda labadaba.

Qabanqaabooyinka guud

Tirada dadka ugu badan ee joogi kara waxay ku xiran tahay:

- in la isticmaalayo shahaado koroone/tijaabaqaad
- in dadku haystaan goobo joogto ah oo loo tilmaamay
- in ay dibedda ka dhacayaan iyo in ay gudaha ka dhacayaan

Haddii aan la isticmaalayn shahaadada koroona:

	<i>Gudaha</i>	<i>Dibedda</i>
<i>Leh meelo joogto ah oo laysu tilmaamay</i>	Ugu badnaan 1000 qof. Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiiba.	Ugu badnaan 2000 oo qof. Ilaa iyo 500 kooxdiiiba.
<i>Aan lahayn meelo joogto ah oo laysu tilmaamay</i>	Ugu badnaan 400 oo qof. Ilaa iyo 200 oo qof kooxdiiiba.	Ugu badnaan 800 qof. Ilaa iyo 200 qof kooxdiiida.

Haddii la isticmaalayo shahaadada koroona:

	<i>Gudaha</i>	<i>Dibedda</i>
--	---------------	----------------

<i>Leh meelo joogto ah oo laysu tilmaamay</i>	Ugu badnaan 5000 oo qof (horey u ahaa 3000 oo qof). Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiiba, iyo ugu badnaan 50 % inta goobtu qaaddo.	Ugu badnaan 10000 qof (horey u ahaa 7000 oo qof). Ilaa iyo 500 qof kooxdiiiba, iyo ugu badnaan 50 % inta goobtu qaaddo.
<i>Aan lahayn meelo joogto ah oo laysu tilmaamay</i>	Ugu badnaan 1500 oo qof. Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiiba, iyo ugu badnaan 50 % inta goobtu qaaddo.	Ugu badnaan 3000 oo qof. Ilaa iyo 500 oo qof kooxdiiiba, iyo ugu badnaano 50 % inta goobtu qaaddo.

Faahfaahin intaan ka badan ka eeg [qorshaha dib u furid tartiib-tartiib ah](#).

Ciyaaraha-, dhaqanka- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

Waxaa laysku boorrinayaa in firfircoonida dibedda lagu qabto meeshii gudaha lagu qaban lahaa. Talada ah in 1 mitir la kala fogaado dibedda iyo gudaha labadaba waa layska dhaafayaa marka ay isu dhowaashadu lagama maarmaan u tahay fulinta firfircoonida.

Dadka waaweyn waxaa lagu talinayaa in tirada kooxuhu ahaato ilaa 30 qof gudaha, dibeddana 40 qof.

Ciyaartoydu waa ka qaybqaadan karaan ciyaaraha ama tartammada ka dhacaya gobollada/degmo-ciyaareedyada kale (ee waddanka), dibedda iyo gudaha labadaba ayada oo aan lagu xirayn in 1 mitir la kala fogaado.

Qoob-ka-ciyaarayaasha, muustikaalayda iyo kuwa fankooda masraxyada ku soo bandhiga ee aan fannaaniinta xirfadlayaasha ah ahayn waa laga dhaafayaa xeerka 1-ka mitir marka la joogo qabanqaabo dhaqan oo dibedda ka dhacaysa iyo mid gudaha ka dhacaysa labadaba, xataa waa laga dhaafayaa marka aysan ahayn kuwo isla tababbarta.

Ciyaaraha heerka sare

Ciyaaraha heerka sare sidii caadiga ahayd ayay u soconayaan. Taas oo laga wado in ciyaaraha horyaalka lagu qaban karo dibedda iyo gudaha labadaba.